| **Cinwaanka:** Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale iyo Qiime-dhimista Kharashyada Bukaanka | | **Lambarka:** L3003 |
|---|---|---|
| **Buug-yare:** Maamul | **Qaybta:** Dhaqaale | **Taariikhda Dhaqangalka:** 25/08/2025 |

# I. UJEEDO:

**A.** Iyadoo looga dan leeyahay Siyaasadda Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale iyo Qiime-dhimista Kharashyada Bukaanka, CHOC Enterprise waxa loola jeedaa shabakadda daryeelka ururada daryeelka caafimaad, adeegyada, iyo adeeg bixiyayaasha la xiriira CHOC. Shirkadda CHOC waxa ku jira shirkadahan soo socda:

1. Isbitaalka CHOC – isbitaalka carruurta ee wayn ee ku yaalla Orange, California, taas oo adeegyo caafimaad oo khaas ah siiya carruurta.
2. CHOC ee Isbitaalka Mission - Xarrun caafimaad oo ku taalla Isbitaalka Providence Mission ee ku yaalla Mission Viejo, California, oo bixinaya daryeel caafimaad carruureed iyo adeegyo takhasuseed.
3. Takhasuslaha CHOC - Koox dhakhaatiir ku takhasusay caafimaadka carruurta oo bixiya daryeel takhasuseedka qaybaha kala duwan ee takhasus hoosaaska caafimaadka carruurtaa ee shebekadda CHOC.
4. Shebekedda Daryeelka Aasaasiga ah ee CHOC - shebekad daryeel bixiyayaal aasaasi ah oo la shuraako ah CHOC, oo adeegyo daryeel caafimaad oo buuxa siiya carruurta laga soo bilaabo dhalashada illaa dhalinyaronimada.

Iyagoo wadajira, ayay hay'adahani u noqonayaan Shirkadaha CHOC (hadda ka dib loogu yeedhi doono CHOC), kuwaas daryeel caafimaad carruureed tayo sarreeya ku bixiya takhasusaadyo iyo goobo kala duwan, iyadoo loo eegayo shuruudaha iyo xaaladaha lagu cayimay Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale.

**B.** CHOC waxa ka go'an inay daryeel caafimaad iyo gurmad tayo leh siiyaan dhammaan bukaanada iyada oo aan loo eegayn xaaladda maaliyadeed ee bukaanka. Bukaanada buuxiya shuruudaha loo dejiyay Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale (Financial Assistance Program) ayaa u qalmi kara inay helaan Kaalmada Dhaqaale si ay ugu daboolaan dhammaan ama qayb ka mid ah kharashaadka daryeelka caafimaadka bukaanka. Si aad u codsato Kaalmada Dhaqaale fadlan tag websaydkeena (www.CHOC.org/patients-family/pay-bill). CHOC waxay sidoo kale dheefo siisaa bulshada ballaaran marka laga fiiriyo dhanka waxbarashada caafimaadka iyo cilmibaarista caafimaadka.

**C.** Siyaasaddan marka la fiirinayo, Kaalmada Dhaqaale waxa laga yaabaa in la siiyo bukaanada bilaa caymiska ah ama aan haysan caymis ku filan ee aan iskood iskaga bixin karayn kharashaadka daryeelka caafimaadkooda. U-qalmitaanka Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale waa in aan lagu saleyn da'da, jinsiga, fikirka galmada, qowmiyadda, asal ahaan halka qofku ka soo jeedo, naafonimo ama diinta.

Xuquuqda Daabacaadda 2025. Children's Hospital of Orange County. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

**D.** Xaaladaha qaarkood, Kaalmada Dhaqaale waxa la siin karaa bukaanada xaaladooda dhaqaale aanay u saamaxayn ama aanay suurtogal ahayn inay iska bixiyaan kharashaadka adeegyada caafimaadka lagama maarmaanka ah. Qiimeynta daruurinimada daawaynta caafimaadka ee CHOC waxay lag saleyn doonaa go'aan caafimaad. Go'aanka caafimaad ee dhakhtarka bukaanka ama dhakhtarka Waaxda Gurmadka Degdega ah ayaa noqon doona shuruudda keli ah ee lagu go'aaminayo helitaanka adeegyada CHOC.

**E.** Siyaasaddani waxay ku dabbaqmaysaa dhammaan Bukaan-jiifka iyo Bukaan-socodka CHOC, oo ay ku jiraan CHOC Medical Foundation. CHOC waxay u qalmitaanka Kaalmadeena Dhaqaale ku saleysaa Codsiyada Dhaqaale ee hadda. CHOC ilo dibadeed kama raadiyaan u qalmitaanka ama go'aaminta Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale (FAP).

## II. QEEXITAANADA:

**A.** **Taariikhda Bukaanka:** Lambarka xogta caafimaadka, magaca bukaanka, taariikhda dhalashada, xaaladda caymiska, u qalmitaanka taageero kale.

**B.** **Qoyska bukaanka:** Ujeedooyinka siyaasaddan waa sida soo socota:

1. Dadka 18 sano jirka ah ama ka wayn, lamaanaha, dadka u wada nool sida ku qeexan Qaybta 297 Xeerka Qoyska California; iyo carruurta madaxa bannaan ee ka yar da'da 21 sano jirka, ama jira da'a kasta haddey naafo qabaan, haddii ay ku nool yihiin guriga ama aysanba ku noolayn;
2. Qof kasta oo ka yar da'da 18 sano jir ama ilmo qof weyn ku tiirsan oo jira da'da 18 sano ilaa 20 sano, oo ay ku wada jiraan dhamaan, waalidka, qaraabada daryeel bixiyaha, iyo carruurta kale ee ku tiirsan waalidka ama daryeel bixiyaha ee ka yar da'da 21 sano, ama jira da' kasta haddey uu naafo leeyihiin, sida waafaqsan Qodobka 1614(a) ee Qaybta A ee Cinwaanka XVI ee Sharciga Soshal Sekuritiga..

## III. SIYSAADDA:

**A.** Waa siyaasadda CHOC in la go'aamiyo u qalmitaanka kaalmada Dhaqaale xilliga isdiiwaangelinta, iyadoo loo marayo nidaamka qiimeynta dhaqaalaha ee dhammaan bukaanada aan buuxin shuruudaha carbuun dhigista ee CHOC.

**B.** Siyaasaddani waxay bukaanka dayn-bixinta ku liita ka soocaysaa bukaanka u qalma ee Kaalmada Dhaqaalaha inay fiiriyaan haddii qoyska bukaanku aanu rabin inuu lacagta bixiyo iyo inay caddahay in aanay iska bixin karayn. In bukaanku iyo/ama qoyska bukaanku ku fashilmaan u hogaansanka codsiga macluumaadka lagu caddeynayo awood la'aanta bixinta kharashka adeega waxaa lagu waayi karaa xuquuqda laguugu tixgelinayo Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale.

**C.** Hadafka CHOC waa in la aqoonsado bukaanka xaqa u leh Kaalmada Dhaqaale xilliga diiwaangelinta; hase ahaatee haddii macluumaadka dhammeystiran ee caymiska bukaanka ku saabsan aan la heli karayn sababtoo ah daawayn degdeg ah ayaa loo baahan yahay, ama haddii xaaladda dhaqaale ee bukaanka/masuulka bukaanka ama qoyska bukaanka ay isbeddesho, u qalmitaanka Kaalmada Dhaqaale ee bukaanka waxa la go'aamin karaa ka dib marka adeegyada la bixiyo, oo mararka qaar xitaa waxa go'aanka la gaari karaa ka dib marka biilka bukaanka la soo saaro.

Xuquuqda Daabacaadda 2025. Children's Hospital of Orange County. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

**D.** Haddii shaqaale caafimaad ama dhakhtar uu damco inuu Kaalmada Dhaqaale horey ugu sii codsado bukaan la yaqaan, tilmaamaha iyo habraaca Kaalmada Dhaqaale waxa laga heli karaa websaydka Paws qaybta foomka bangiyada onlaynka.

**E.** Xogta macluumaadka iyo sharafta bukaanka waa loo ilaalin doonaa dhammaan ciddii raadsata ama la siiyo adeegyada Kaalmada Dhaqaale.

**F.** Bukaanada adeegyada ku hela Qolqolka Xaaladaha Degdega ah ee Isbitaalka waxay sidoo kale xaq u yeelan doonaan Kaalmada Dhaqaale si ay iskaga bixiyaan khidmadaha Qolka Xaaladaha Degdega ah. Shirkadda qaabilsan biil-gareynta adeegyada uu dhakhtarka ku bixiyay Qolka Xaaladaha Degdega ah waxay ku tiirsanaan doontaa go’aanka isbitaalka ee ku aadan xaq u lahaanshaha helida FAP, sida uu u baahan yahay Xeerka Caafimaadka iyo Badbaadada qeybta 127405(a)(1)(B).

**G.** Hoos waxa ku qoran liiska bixiyayaasha, ee aan ahayn isbitaalka laftiisa, ee adeegyo caafimaad ahaan lagama maarmaan ah ku bixiya isbitaalka. Si helistooda loo fududeeyo waxa loo taxay iyadoo qaybahooda daryeelka loo eegay. Liiskani wuxu muujinayaa in bixiyayaasha uu daboolayo FAP-ka Isbitaalka.

| Waaxda/Takhasuska Caafimaad | Uu Daboolo FAP-ka Isbitaalka | Aanu Daboolin FAP-ka Isbitaalka |
|---|---|---|
| Xasaasiyadda iyo Difaaca Jirka | x | |
| Suuxdinta ama Kabaabinta | | x |
| Cudurada Wadnaha iyo Xidida Dhiiga | x | |
| Caafimaadka Ilkaha | | x |
| Baaritaanada Raajada | x | |
| Qaybta Xaaladaha Degdega ah | | x |
| Caloosha iyo Uur-ku-jirta | x | |
| Daaweynta Guud/Qoyska | x | |
| Qalliinka Guud | | x |
| Caafimaadka Xubnaha Uur-ku-jirta | x | |
| Qalliinka Neerfayaasha | | x |
| Neerfayaasha | x | |
| Caafimaadka Dhalmada & Taranka Haweenka | x | |
| Caafimaadka Shaqada iyo Shaqaalaha | x | |
| Daawaynta Kansarka | x | |
| Caafimaadka Indhaha | X | |
| Dhakhaatiirta Qalliinka oo Dhan | | x |

Xuquuqda Daabacaadda 2025. Children’s Hospital of Orange County. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

| | | |
|---|---|---|
| **Caafimaadka Dhegaha, Cunaha iyo Sanka** | **x** | |
| **Baarista Dulinada Cudurada Keena** | | **x** |
| **Caafimaadka Carruurta** | **x** | |
| **Daawaynta Jimicsiga/Dibudejinta** | **x** | |
| **Qalliinka Quruxeed** | **x** | |
| **Caafimaadka Cagaha** | | **x** |
| **Cudurada Sambabada** | **x** | |
| **Raajooyinka Daawaynta** | **x** | |
| **Qalliinka Laabta** | | **x** |
| **Caafimaadka Kaadi-mareenka** | **x** | |
| **Qaybaha Kale: Caafimaadka Dhimirka** | **x** | |
| **Qaybaha Kale: Hiddisidayaasha Caafimaad** | **x** | |
| **Qaybaha Kale: Caafimaadka Maqaarka** | **x** | |
| **Qaybaha Kale: Caafimaadka Qanjidhada Hoormoonada** | **x** | |
| **Qaybaha Kale: Caafimaadka Dhiigga** | **x** | |
| **Qaybaha Kale: Khabiir Isbitaal** | **x** | |
| **Qaybaha Kale: Cudurada la isku Gudbiyo** | **x** | |
| **Qaybaha Kale: Daryeelka Caafimaad ee Sabiyada** | **x** | |
| **Qaybaha Kale: Caafimaadka Kelyaha** | **x** | |
| **Qaybaha Kale: Caafimaadka Kala-goysyada iyo Nudaha** | **x** | |
| **Daawada Hurdada ee Kale** | **x** | |

**IV. HABRAACA:**

**A. U Qalmitaanka**

1. Aqoonsiga Kaalmada Dhaqaale waxa lagu gaaraa in la go'aamiyo xaaladda dhaqaale ee bukaanka ama qoyska bukaanka. Go'aamintan waa in la

Xuquuqda Daabacaadda 2025. Children’s Hospital of Orange County. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

sameeyo xilligan diiwaangelinta ama ka hor diiwaangelinta, ama islamarkiiba ka dib hadba sida ugu dhakhsaha badan. Xaaladaha qaarkood, sida marka qofka la dhigo qaybta xaaladaha degdega ah, waxa laga yaabaa inay suurtogal noqon waydo in la go'aamiyo u qalmitaanka Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale illaa ka dib marka bukaanku baxo. Xaaladahn oo kale, ama xaaladaha dhacdooyin dhacaan inta bukaanku xarunta caafimaad joogo ama ka dibba kuwaas oo beddela xaaladda dhaqaale ee bukaanka ama qoyska bukaanka, u qalmitaanka bukaanka ee Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale waa in aanu waqtigu sinnaba u saameyn go'aaminta in bukaanku buuxinayo shuruudaha u qalmitaanka.

2. Masuuliyadda aqoonsashada u qalmitaanka bukaanka ee Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale xilliga bukaanku soo booqdo CHOC, ama ka horba, waa masuuliyadda waaxda diiwaangelinaysa bukaanka. Tani waxay bukaanka ama qoyska bukaanka uga baahanaysaa inay buuxiyaan bayaanka "Baahinta Dhaqaale". Tan waxa la socon kara nuqulo dukumeentiyada ku habboon ah (waraaqaha mushaharaadkii dhowaa, canshuur celisyada dakhliga ama dukumeentiyada kale) si loo go'aamiyo dakhliga qoyska ee sannadlaha ah ee bukaanka ama qoyska bukaanka. Xaaladahan oo kale, sida kor lagu xusay, marka aan u qalmitaanka la go'aamin karin xilliga adeega la bixinayo, Waaxda Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka waa inay bukaanka ama qoyska kala shaqeyso sidii loo go'aamin lahaa u qalmitaanka.
3. Bukaanka ama qoyska bukaanka ee caymiska haysta waxay sidoo kale u qalmi karaan Kaalmada Dhaqaale si ay isaga bixiyaan qaybta biilka ee aanu caymisku daboolayn. Qaybtan waxa ku jiri kara lacagaha caymiska ka hor la sii baxsho, caymis-wadaaga iyo adeegyada aanu caymisku daboolin. Go'aaminta u qalmitaanka bukaanka waa in la waafajiyo tilmaamo la mid ah kuwa bukaan aan caymis haysan.
4. Bukaan, ha lahaado mid caymis caafimaad heysta ama mid aanan heysan, kaas oo ay u sugan tahay Kharash Caafimaad oo Sarreeya waxa laga yaabaa in uu xaq u yeelan karo barnaamijka Kaalmada Dhaqaale. Tani waxa ku jira bukaanada ay u sugan tahay bixinta kharash sanadle ah oo ay jeebkooda uga bixiyeen isbitaalka, kharashkaas oo ka badan 10% Dakhliga Qoyska muddo 12 bilood ee la soo dhaafay. Kharashaadka jeebka laga bixiyo waxay ka dhigan yihiin dhammaan kharashaadka lagu bixiyay daryeelka caafimaad kuwaas oo ayna dib ugu soo magdhawin shirkadda caymiska ama barnaamijka caymiska caafimaadka.
5. Muddada U Qalmitaanka.
   a. Bukaanada la go'aamiyay inay barnaamijka u qalmaan waxa Kaalmada Dhaqaale la siin doonaa muddo lix bilood ah.
6. **Xisaabinta Qaddarka Kaalmada Dhaqaale.**
   a. CHOC waxay heli doonaan macluumaadka dakhliga qoyska bukaanka, oo ay ku jiraan mushaharaadka iyo mushqaayadaha, lacagaha kaalmada ah, lacagaha sooshal sekyuuratiga, dheefaha la siiyo shaqaalaha shaqo-joojinta sameeyay, dheefaha dadka bilaa

Xuquuqda Daabacaadda 2025. Children's Hospital of Orange County. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

shaqada ah, lacagaha taageerada ilmaha, lacagaha waalidku ilmaha ku taageero, faa'iido wadaaga iyo dulsaarada. Wadarta dakhliga qoyska waxa la barbar dhigi doonaa shaxda (eeg Jadwalka A) si loo go'aamiyo u qalmitaanka Kaalmada Dhaqaale ee bukaanka marka la fiiriyo Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka. Bukaanada bilaa caymiska ah ama bukaanada kharashkooda caafimaadku sarreeyo ee dakhligooda qoysku joogo 550% ee Tilmaamaha Saboolnimada ama ka hooseeya ayaa u qalma inay codsadaan Kaalmada Dhaqaale. Kaalmada Dhaqaale qayb ahaan baa loogu tixgelin doonaa bukaanada dakhligoodu ka sarreeyo 400% Tilmaamaha Saboolnimada kana hooseeyaan 550%.

b. Qoysaska dakhligooda sannadlaha ah joogo ama ka hooseeyo 400% Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka waxay 100% u qalmi doonaan Kaalmada Dhaqaale. Bukaanada bilaa caymiska ah ama caymiskoodu kala dhiman yahay ee dakhligooda qoysku, marka la fiiriyo sida lagu go'aamiyay Codsiga Kaalmada, uu ka yar yahay ama le'eg yahay 400% ee tilmaamaha saboolnimada, waxay daryeelka ku heli doonaan bilaash.

c. Si ay daryeel deeq ah u bixiyaan, CHOC waxa sharcigu ku waajibinayaa inay tixgeliyaan qaddarka guud ahaan lagu dallaco dadka haysta caymis daboolaya xaaladaha degdeg ah ama adeegyada daryeelka caafimaadka lagama maarmaanka ah ("Qaddarka Guud ahaan Lagu Dallacay" ama "AGB") iyo inay dammaanad qaadaan in bukaanada hela daryeelka deeqa ah aanay adeegyada caafimaadka lagama maarmaanka ah ku bixin wax ka badan AGB.

d. Bukaanada CHOC Community Clinic waxay Kaalmada Dhaqaale ugu qalmi doonaan sida ku cad siyaasaddan iyadoo la adeegsanayo Jadwalka B si loo xisaabiyo miisaanka lacag-wada-bixinta ee isbeddelaya ee booqashadiiba ee bukaanada hoosmaray 200% Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka.

e. Bukaanada codsanaya Kaalmada Dhaqaale oona helaaya oggolaansho buuxa ama mid qayb ahaan ah, oggolaanshahooda ku aadan helitaanka kaalmada waxa loo gudbin doonaa shirkadda qaabilsan biil-gareynta adeegyada uu dhakhtarka ku qabto Qolka Xaaladda Degdega ah. Shirkadda qaabilsan biil-gareynta adeegyada uu dhakhtarka ku bixiyay Qolka Xaaladaha Degdega ah waxay ku tiirsanaan doontaa go’aanka isbitaalka ee ku aadan xaq u lahaanshaha helida FAP, sida uu u baahan yahay Xeerka Caafimaadka iyo Badbaadada qeybta 127405(a)(1)(B).

7. **Siyaasadda Qiimo-dhimista Lacagbixinta**

a. Bukaanada dakhliga qoyskoodu u dhexeeyo 401% iyo 450% ee Heerka Saboolnimada Federaalka, Isbitaalku wuxu siin karaa Jadwal qiimo dhimis Khidmadeed Gaar ah, halkaas oo kharashka

Xuquuqda Daabacaadda 2025. Children’s Hospital of Orange County. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

caafimaadka la isla ogolaaday loo sameynayo qiimo dhimis 75% ah. Heerkan, lacagcelinta CHOC heli doonto kama badnaan karto lacagta ay CHOC ku heli lahaayeen isla adeega ama adeegyada ee ka helaan Medicare ama Medi-Cal guud ahaan.

b. Bukaanada bilaa caymiska ah ee dakhliga qoyskoodu u dhexeeyo 451% iyo 550% ee Heerka Saboolnimada Federaalka ee CHOC, Isbitaalku wuxu siin karaa Jadwal qiimo dhimis Khidmadeed Gaar ah, halkaas oo kharashka caafimaadka la isla ogolaaday loo sameynayo qiimo dhimis 50% ah. Heerkan, lacagcelinta CHOC heli doonto kama badnaan karto lacagta ay CHOC ku heli lahayd isla adeega ama adeegyada ee ka helaan Medicare ama Medi-Cal guud ahaan.

8. Tilmaamaha U Qalmitaanka Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee CHOC waxay ku saleysan yihiin Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka ee dhowaan la daabacay. Jadwalka A ayaa qeexaya bartilmaameedyada dakhliga qoyska mara la fiirsho Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka, oo sannadle loo daabaco.

9. **U Qalmitaanka Lacagbixinaha Billaha ah**

a. Bukaan kasta ama qoyska bukaanka ee u qalma ee Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha loogu ogolaaday qiimo-dhimis kharasheed qayb ah ayaa sidoo kale u qalmi doona inay lacago bille ah bixiyaan. CHOC iyo qoyska bukaanka ayaa ka gorgortami doona shuruudaha qorshaha lacagbixinta. Haddii qoyska bukaanka iyo CHOC ay heshiis gaadhi kari waayaan, qoyska bukaanka waxa laga rabaa inay buuxiyaan foomka qorshaha lacagbixinta muddad fidsan ee CHOC FAP (Jadwalka C). Marka foomkan helaan, CHOC waxay qiimeyn doonaan wadarta dakhliga qoyska kadib marka laga jaro kharashaadka aasaasiga ah ee qoyska. Qorshe lacagbixineed bille ah ayaa qoyska loo bandhigi doonaa kaas oo aan ka badnaan karin 10% dakhliga qoyska marka laga jaro kharashaadka aasaasiga ah. Inta lagu jiro muddada lacagcelinta ee la ansixiyay, CHOC wax dulsaar ah kuma dallaci doonto haraaga koontada ee qiimo dhimista loo sameeyay.

b. Qorshaha lacagbixinta muddada fidsan waxa lagu dhawaaqi doonaa inaanu shaqeynayn ka dib marka bukaanka ama qoyksa bukaanku ku fashilmaan inay si joogto ah lacagta u bixiyaan muddo 90 beri ah. Ka hor inta aan lagu dhawaaqin in qorshaha lacagbixinta muddada fidsan aanu shaqeynayn, CHOC, ama hay'adda lacagta u uruurinaysa, ama cidda ay u asteeyeen waa inay isku day macquula sameeyaan kaas oo ay ku ogeysiinayaan bukaanka ama qoyska bukaanka taleefan ahaan ama waraaq loogu dirayo cinwaankii ugu dambeeyay ee lagu ogaa, in qorshaha lacagbixinta muddada fidsan ku dhow yahay inuu fashilmo oo ay jirto fursad ay dib uga wada hadli karaan haddii uu codsado bukaanku ama qoyska bukaanku.

Xuquuqda Daabacaadda 2025. Children's Hospital of Orange County. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

**B. Waxyaabaha laga soo reebay:**

1. In la fahmo inay jiraan xaalado adag oo yimi kuwaas oo u baahan tixgelin gaar ah si Kaalmada Dhaqaale loogu ansixiyo bukaanada aan buuxin shuruudaha la dejiyay. Wakiilada CHOC waa inay ka warqabaan tan markay kiisaska bukaanada shaqsiga ah u qiimeynayaan Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale. In kastoo aanay suurtogal ahayn in la bixiyo liiska dhammeyska tiran ama go'an ee xaaladaha dhibaatada uga sii daraya ee iman kara, qodobada muhiimka ah ee la tixgelin doono waxa ka mid ah:
   a. Qaddarka daynta lagu leeyahay bukaanka ama qoyska bukaanka marka loo eego wadarta dakhligooda. Haddii wadarta kharashka bukaanku jeebkiisa ka bixinayo markuu joogo CHOC ka badato 10% dakhliga sannadlaha ah ee bukaanka ama qoyska bukaanka 12 kii bilood ee la soo dhaafay.
   b. Xaaladda caafimaad ee bukaanka ama daryeel bixiyaha qoyskiisa.
   c. Sida ay bukaanka ama qoyska bukaanka uga go'an tahay inay CHOC kala shaqeeyaan isticmaalka dhammaan ilaha lacagbixineed ee kale ee la heli karo.
2. Xaalad kasta oo loo tixgelinayo inay ka qayb noqon karta "xaaladaha dhibaatada uga sii daraya" waa in lagu soo wargeliyo Agaasimaha Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka. Kiisaska soo hoos gelaya qaybtan waxay u baahan karaan inuu soo ansixiyo Ku xigeenka Sarkaalka Fulinta Maaliyadeed ee Ugu Sarreeya.

**C. Nidaamka Aqbalaadda/Diidmada/Racfaanka Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale**

1. Koontada bukaan kasta oo lagu taliyay inuu si buuxda ama qayb ahaan u helo Kaalmada Dhaqaale, ka dib markuu buuxiyo tilmaamaha siyaasaddan ku xusan waxa looga baahan yahay nidaamyada saxiixa ogolaanshaha ee soo socda:
   a. **CHOC (Isbitaalka iyo Rugaha Caafimaad)**

| | |
|---|---|
| Ilaa $2,000 | Xirfadlaha Xaqiijiya Bixinta Lacagta Rugta Caafimaadka |
| Ilaa $10,000 | Kormeeraha Kooxda Xaqiijisa Bixinta Lacagta Rugta Caafimaadka |
| Ilaa $50,000 | Maareeyaha Kooxda Xaqiijisa Bixinta Lacagta Rugta Caafimaadka |
| Ilaa $100,000 | Agaasimaha Kooxda Xaqiijisa Bixinta Lacagta Rugta Caafimaadka |
| Ilaa $250,000 | Agaasimaha Sare /Fulinta |
| Ilaa $1,000,000 | Maamule Ku Xigeenka Kormeera Hawlaha Dakhliga ee Rugta Caafimaadka |
| Wax ka badan $1,000,000 | Madaxa Fulinta ee Ugu Sareeya Maareynta Dhaqaalaha Shirkadda |

Xuquuqda Daabacaadda 2025. Children's Hospital of Orange County. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

b. **CHOC Medical Foundation**

| | |
| --- | --- |
| Ilaa $2,000 | Xirfadlaha Xaqiijiya Bixinta Lacagta Rugta Caafimaadka |
| Ilaa $10,000 | Kormeeraha Kooxda Xaqiijisa Bixinta Lacagta Rugta Caafimaadka |
| Ilaa $50,000 | Maareeyaha Kooxda Xaqiijisa Bixinta Lacagta Rugta Caafimaadka |
| Ilaa $100,000 | Agaasimaha Kooxda Xaqiijisa Bixinta Lacagta Rugta Caafimaadka |
| Ilaa $250,000 | Agaasimaha Sare/Fulinta |
| Ilaa 1,000,000 | Maamule Ku Xigeenka Kormeera Hawlaha Dakhliga ee Rugta Caafimaadka |
| Wax ka badan $1,000,000 | Madaxa Fulinta ee Ugu Sareeya Maareynta Dhaqaalaha Shirkadda |

2. Marka la gaaro go'aanka bukaanka loogu ogolaanayo ama loogu diidayo Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale, waraaq ayaa loo diri doonaa bukaanka taas oo ogeysiin doonta go'aanka la gaadhay. Haddii codsiga Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale la soo diido, wakiil CHOC ka socda ayaa la soo xiriiri doona bukaanka ama qoyska bukaanka si ay isula meel dhigaan sida lacagta loo bixinayo.
3. **Nidaamka Racfaanka:**
   Haddi mar uun inta lagu jiro nidaamka ansixinta Kaalmada Dhaqaale codsiga khilaafku ku yimaaddo, bukaanka ama qoyska bukaanka ayaa xaq u leh inay codsadaan in codsigooda dib u eegis loogu sameeyo heerka xiga ee nidaamka ansixinta. Go'aanka kama dambeysta ah ee diidmada Kaalmada Dhaqaale waxa si gaar ah isaga Maamule Ku Xigeenka Fulinta iyo Ku xigeenka Sarkaalka Fulinta Maaliyadeed ee Ugu Sarreeya, oo go'aankooda waxa loo tixgelin doonaa inuu kama dambeys yahay.
4. Racfaanka bukaanka ama qoyska bukaanka waa in qoraal ahaan loogu soo gudbiyo Agaasimaha Xisaabaadka Bukaanada muddo soddon (30) beri gudahood ah oo ka bilaabmaysa taariikhda ogeysiinta diidmada koobaad.
5. Bixinta Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale meesha kama saareyso in qofka lagu soo dallaco kharashka dhammaan adeegyada isla marka adeega la bixiyo ama ka dibba, haddii la ogaado in xog khaldan, been abuur ah ama kala dhiman loo adeegsaday nidaamka codsiga. Intaas waxa dheer, CHOC waxay leedahay xuquuq ay raadsan karaan dhammaan wixii sixitaano ah, oo ay ku jiraan inkastoo aanay ku koobnayn magdhow madani ama ciqaabeed oo ka raadsanayaan cidda bixisa macluumaad been abuur ah, khaldan ama kala dhiman si ay ugu qalmaan Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale.

Xuquuqda Daabacaadda 2025. Children's Hospital of Orange County. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

**D. Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale: Ogeysiinta Bukaanka ama Qoyska Bukaanka**

1. Bayaanada bukaanka CHOC waxay bukaanada u diri doonaan wargelin kala talinaya siyaasadda Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee CHOC, iyo xogta xiriirka ee ay ku heli karaan wixii macluumaad dheeraada ah ee ku saabsan caawimada. Wargelintan waxa lagu dari doonaa xaashida ku qoran bayaan gaaban oo luqadaha ah oo ayna lasocotaa bayaankan soo socda oo lagu bixinaayo Ingiriisi iyo 15-ka luqadood ee ugu badan ee ay ku hadlaan dadka ay u sugan tahay xaddidaadda kooban ee aqoonta-Ingiriisiga (LEP) ee jooga California, sida ay go’aamisay Waaxda Adeegyada Daryeelka Caafimaadka ee Gobolka. FIIRO GAAR AH: Haddii aad u baahan tahay caawimaad lagu bixinaayo luqaddaada, fadlan wac [phone number where patients may obtain more information]. Xafiisku waxa uu furan yahay [offices hours] waxaana uu ku yaallaa [office location information]. Gargaarka iyo adeegyada loogu talagalay dadka naafada ah, sida dukumeentiyada ku qoran luuqadda indhoolaha, daabacaadda farta waaweyn, kuwa maqalka ah, iyo qaabab elektarooniga ah ee kale ee marin loo heli karo, ayaa sidoo kale la heli karaa. Adeegyadani waa kuwo bilaash ah”. Intaas waxa dheer, dhammaan bayaanada bukaanka waxa la socon doona sida qoyska bukaanku u heli karaan macluumaad ku saabsan California Health Benefit Exchange, iyo sidoo kale qorsheyaasha caafimaad ee gobolku ama degmadu maalgeliso. Isbitaalku wuxu hayn doono codsiyo loogu talagalay gobolka iyo degmadaba.
2. Soo koobidda Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale oo ay la socdaan xogta xiriirka oo ku qoran af Ingiriisi iyo af Isbaanish waa in lagu soo dhejiyo goobaha saxmadda badan ee CHOC, sida qaybta Qaabilaadda, Qolka Xaaladaha Degdega ah, Rugaha, Qaybta Diiwaangelinta Bukaan-socodka iyo Xafiisyada Xisaabaadka Bukaanada.
3. CHOC waxay dhammaan bukaanada lacagta iskood isaga bixinaya barta ay adeega ka helayaan ku siin doontaa Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale iyo xogtiisa xiriirka, iyo sidoo kale macluumaad ku saabsan barnaamijyada dawladu maalgeliso iyo xogta xiriirka ee barnaamijka California Health Benefit Exchange.

**E. Nidaamka Lacag Uruurinta:**

1. Haddii bukaanku kaalmo ugu qalmo si waafaqsan Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale oo uu dedaal badan ku bixinayo siduu daynta ugu bixin lahaa waqti macquul ah, CHOC ama wakiiladeedu waa in aanay u dirsan, ama ugu hanjabin inay u dirayso hay'ad kale oo lacagta ka soo uruurisa, haddii taasi saameyn taban u geysanayso sumcadda daymeed ee bukaanka. Haddii ay CHOC ku qasbanaato inay koonto ku wareejiso wakaalad dayn uruurineed iyaga ka baxsan, qaddarka loo gudbiyay wakaaladda dayn uruurinta waa inuu noqdo midka la dhimay ee bukaanka xaqa u leeyahay marka la fiirsho Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale. CHOC ma geli doonto wax dedaalo dayn ururineed aan caadi ahayn. Haddii ay dhacdo in bukaanku

Xuquuqda Daabacaadda 2025. Children’s Hospital of Orange County. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

lacag ka badan lacagtii lagu lahaa ku shubo koontadooda CHOC, CHOC waa inay bukaanka u celiso lacagta dheeraadka ah iyo dulsaarkii ku kordhay oo waafaqsan heerka shuruucda dejisay lagana soo bilaabay taariikhda isbitaalku bukaanka lacagta ka helay. CHOC, si kastaba ha ahaatee, kuma waajib ah inay celiyaan lacag ama dulsaar haddii lacagta dheeraadka ah ka yar tahay $5.00. Isbitaalku wixii lacag dheeraad ah ee ka yar $5.00 wuxu ka jari doonaa kharashka aad gasho muddo 60 maalmood ah ka dib marka aad bixiso.

2. CHOC waa in aanay, markay la tacaamulayaan bukaano aan caymis haysan oo dakhligoodu ka hooseeyo 400% Heerka Saboolnimada Federaalka, kharashka ka goosan dakhligooda ama amar maxkamadeed ahaan uga dalban lacag bixin ku tacaluqda biilasha adeegyada caafimaadka CHOC. Tani CHOC kama hor istaagayso inay lacagcelin ka dalbadaan qolo saddexaad haddii qolodaas magdhow ahaan loogu leeyahay kharashka.

**F. Dukumeentiyada Qiimo-Dhimisyada Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale**

Xaaladaha la go'aamiyo in bukaanku u qalmo Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale, waxa muhiim ah in galka bukaanka si habboon loo diiwaangeliyo si qaab fudud loogu aqoonsan karo bukaanka, iyo sidoo kale si xog sax ah looga hayo xaqiiqooyinka ka dhashay go'aaminta u qalmitaanka Kaalmada Dhaqaale. Dukumeentiyada ugu yar ee looga baahan karo kiiska Kaalmada Dhaqaale waxay noqon karaan mid ka mid ah kuwan soo socda:

1. Nuqul Xaashida Muujinta Xoga Dhaqaale ee bukaanka ama qoyska bukaanka ah, oo ay la socdaan dukumeentiyada kale ee taageeraya (t.a canshuur celiskii sannadihii la soo dhaafay (dukumeentiyada la soo bandhigayo), Foomamka W-2, ama waraaqaha mushaharka ee hadda).
2. Nuqulada dukumeentiyada, qoraalada iwm. ee dheeraadka ah, ee sharraxaya xaaladaha dhibaatada uga sii daraya ee la tixgeliyay markii la go'aaminayay u qalmitaanka Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale (haddii la heli karo ama loo baahan yahay).
3. Nuqulka "Ansixinta Kaalmada Dhaqaale" oo ay saxeexeen wakiilada Isbitaalka ee ku habboon (haddii la heli karo).
4. Kicitaanka ganacsi ee sannadkii u dambeeyay (toos ugu qalmitaanka Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale).

**G. Warbixinaha**

Kaalmada Dhaqaale waa in lala diiwaangeliyo macluumaadkan soo socda:

1. Xogta bukaanka oo ay ku jirto Macluumaadka Caafimaad ee Ilaashan (PHI) waxa loo ilaalin doonaa qaab xafidaysa qarsoodinimo macluumaadkaas waxana loo diiwaangelin doonaa keliya haddii ay lagama maarmaan u tahay Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale.
   a. Xaaladda bukaan-socod ama bukaan-jiif
   b. Kharashka bukaanka ee guud
   c. Kharashaadka Kaalmada Dhaqaale, la ansxiyay ama la diiday
   d. Taariikhda ansixinta/diidmada
   e. Sababta loo diiday

Xuquuqda Daabacaadda 2025. Children's Hospital of Orange County. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

2. Dhammaan faylasha codsigu waa kuwo sir ah waxana lagu kaydin goob xafidan muddo ugu yaraan saddex sannadood ah ka dib taariikhda codsiga iyo dhammaadka hanti dhowrka sannad xisaabeedka CHOC. Dhammaan xogta Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale waxa la hayn doonaa muddo toddobo (7) sannadood ah. Dhammaadka muddada la cayimay, dhammaan macluumaadka waa la burburin doonaa ama waxa loo hayn doonaa qaab ilaalinaysa sirnimada iyo qarsoodinimada bukaanka.
3. Siyaasaddan waxa lagama beddeli karo si loo saaro ama loo yareeyo dheefaha dheef-qaatayaasha. Isbeddel kasta oo lagu sameynayo siyaasaddan waa inay marka hore soo ansixisaa Waaxda Hogaansamida.

**V. TIXRAACYO:**

**A.** Maamulka Kooxda Maareysa Bixinta Lacagta Rugta Caafimaadka, Zimmerman iyo Shaqaalaha Kale. Diiseembar 2002.

**B.** Ururka Isbitaalada California, Mabaadi'da iyo Tilmaamaha Tabaruca ee lagu caawinayo Bukaanada Bilaa Caymiska ah ee Dakhligoodu Hooseeyo Febraayo, 06, 2004.

**C.** Ururka Isbitaalada Maraykanka, Bayaanka Mabaadi'da iyo Tilmaamaha Biil Dallicsita iyo Dayn Soo Uruurinta, Abril 27, 2004.

**D.** Xeerka Biilalka 774 Chan-Hospitals: siyaasadaha qiimeynta caddaaladda ah.

**E.** California Hospital Association, Shuruudaha Fulinta Daryeelka Hay'adaha Sadaqada AB 774 Noofeembar 3, 2006.

**F.** Xeerka Xakamaynta Barclays California, Cinwaanka 22, Cutubka 7, Qaybta 75049.

**G.** Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha, Hagitaanada Federaalka ee Dakhliga Saboolka. https://aspe.hhs.gov/topics/poverty-economic-mobility/poverty-guidelines

**H.** Sharciga Barnaamijka Xarunta Caafimaad: Qaybta 330 ee Xeerka Adeegyada Caafimaadka Dadwaynaha (42 U.S.C. 254b).

**I.** Xeer-nidaamiyayaasha Barnaamijka 42 xeerka Xakamaynta Federaalka (CFR) Qaybta 51c iyo 42 CFR Qaybaha 56.201-56.604 ee loogu talagalay Xarumaha Caafimaadka Bulshada iyo Soo-galootiga CDPH Soo-saarista AFL La xiriirita Qiimo-dejinta Isbitaalada California ee Caddaaladda ah, Noofeembar 5, 2014.

## CIDDA SIYAASADDA WAX KU SOO BIIRAYSAY, ANSIXINAHA, IYO TAARIIKHDA

| Cidda Siyaasadda waxa ku soo biirisay | |
|---|---|
| Caawiyayaasha: | Maamule, Koontooyinka Bukaanka |
| Cidda Siyaasadda iska Kaashatay: | |
| Madaxa Waaxda: | Agaasimaha Fulinta Dakhliyada |
| Xubin Ka Tirsan Maamulka Sare ee Fulinta: | Ken Baxter, Maamule Ku Xigeenka Dakhliga |

Xuquuqda Daabacaadda 2025. Children's Hospital of Orange County. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay. Ma jirto qayb ka mid ah dukumeentigan oo dib loo soo saari karo iyadoo aan oggolaansho qoran laga haysan Maamulka CHOC.

**Jadwal A**

| Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka ee la daabacay 2025 | | | | |
|---|---|---|---|---|
| **Tirada xubnaha Qoyska** | **Ilaa 100%** | **Ilaa 400%** | **Ilaa 450%** | **Ilaa 550%** |
| **1** | **$15,650** | **$62,600** | **$70,425** | **$86,075** |
| **2** | **$21,150** | **$84,600** | **$95,175** | **$116,325** |
| **3** | **$26,650** | **$106,600** | **$119,925** | **$146,575** |
| **4** | **$32,150** | **$128,600** | **$144,675** | **$176,825** |
| **5** | **$37,650** | **$150,600** | **$169,425** | **$207,075** |
| **6** | **$43,150** | **$172,600** | **$194,175** | **$237,325** |
| **7** | **$48,650** | **$194,600** | **$218,925** | **$267,575** |
| **8** | **$54,150** | **$216,600** | **$243,675** | **$297,825** |
| **Qiimo-dhimista** | **100%** | | **75%** | **50% Bukaanada Aan La Caymin** |

**Jadwal B**

| **Jadwalka Qiimaha Isbeddelaya<br>Tilmaamaha Dakhliga Guud ee Saboolnimada Federaalka (FPL)**<br>Waxa loo eegi doonaa Tirada Qoyska - Dhaqangelaya 2025 | | | |
|---|---|---|---|
| **Xeerka Qorshaha Caafimaadka** | **Hay'adaha Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah** | **Iska-bixinta Kharashka - Qabanqaabinada gaarka ah** | **Iska-bixinta kharashka** |
| **Tilmaamaha FPL** | **100% ama ka hooseeya** | **101% - 200%** | **Ka sarreeya 200%** |
| **tirada dadka / qoyskiiba** | | | |
| **1** | $0-$1,304 | $1,305 -$2,608 | Ka sarreeya $2,609 |
| **2** | $1,763 | $1,764 - $3,525 | Ka sarreeya $3,526 |
| **3** | $2,221 | $2,222 - $4,442 | Ka sarreeya $4,443 |
| **4** | $2,679 | $2,680 - $5,358 | Ka sarreeya $5,8359 |
| **5** | $3,138 | $3,139 - $6,275 | Ka sarreeya $6,276 |
| **6** | $3,596 | $3,597 - $7,192 | Ka sarreeya $7,193 |
| **7** | $4,054 | $4,055 - $8,108 | Ka sarreeya $8,109 |
| **8** | $4,513 | $4,514 - $9,025 | Ka sarreeya $9,026 |
| **CMG**<br><br>**Qiimaha Adeega** | $10 Booqasho Jirro<br><br>$0 Qaadashada Tallaalka Hargabka oo Keli ah<br><br>Adeegyada WCC codso Gateway | $60 Booqasho Jirro oo Cusub<br>$40 Booqasho Jirro oo Horey u Jirtay<br>$25 Tallaalka Hargabka oo Keliya Qaadashada<br>Adeegyada WCC codso Gateway | $85 Booqashooyinka kala dhiman iyo Fayoobi-la'aanta<br><br>$25 Tallaalka Hargabka oo Keliya Qaadashada<br>$100 Booqashada Caafimaad Buuxa |
| **Breathmobile Qiimaha Adeega** | $25 Booqashada Xafiiska<br>$0 Qaadashada Tallaalka Hargabka oo Keli ah | $25 Booqashada Xafiiska<br>$25 Tallaalka Hargabka oo Keliya Qaadashada | $25 Booqashada Xafiiska<br>$25 Tallaalka Hargabka oo Keliya Qaadashada |
| **Shaybaarada** | "Ku Dallac Bukaanka"<br>Illaa iyadoo uu lacagta bixiyo iyadoo qiimo dhimisi rugta ka jirto maahane, haddii kale | "Ku Dallac Bukaanka"<br>Illaa iyadoo uu lacagta bixiyo iyadoo qiimo dhimisi rugta ka jirto maahane, haddii kale "Ku Dallac Bukaanka" | "Ku Dallac Bukaanka"<br>(biilka waxay shaybaarka/raajada kaga helayaa qiimaha caadiga ah) |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | "Ku Dallac Bukaanka" | | |
| **Raajada** | "Ku Dallac Bukaanka" | "Ku Dallac Bukaanka" | "Ku Dallac Bukaanka" (biilka waxay Raajada kaga helayaa qiimaha caadiga ah) |
| **Daawooyinka La Isu Qoro** | Daawada la bixiyay Bukaanka ayaa bixinaya | Daawada la bixiyay Bukaanka ayaa bixinaya | Daawada la bixiyay Bukaanka ayaa bixinaya |
| **Kaydadka** (t.a qalabka haya agabka caawinta neefta, ulaha jiiska) | Laga helayo kaydka rugta caafimaadka iyadoo ku xiran baahida | Laga helayo kaydka rugta caafimaadka iyadoo ku xiran baahida | |

**Jadwal C**
**CHOC/Isbitaalka Xuska ee Degmada Carrroll (CCMH) FAP Foomka Qorshaha Lacagbixinta Muddada Fidsan**

| | | |
|---|---|---|
| **Taariikhda:** | | **Taariikhda Adeega (DOS):** |
| **Magaca Bukaanka:** | | **ADJ**<br>**Taariikhda:** |
| **Dakhliga Billaha ah: $** | | |
| **Ka Jar Kharashka Nolosha Aasaasiga ah:** | | |
| **Kirada/Bixinta Lacagta Guriga** | **$** | |
| **Dayactirka** | **$** | |
| **Cuntada** | **$** | |
| **Kaydka Alaabooyinka** | **$** | |
| **Adeegyada Guriga** | **$** | |
| **Dharka** | **$** | |
| **Lacagaha kharashka caafimaad** | **$** | |
| **Caymiska** | **$** | |
| **Dugsiga/Daryeelka Ilmaha** | **$** | |
| **Taageerada Ilmaha/Lamaanaha** | **$** | |
| **Gaadiidka** | **$** | |
| **Kharashka Gaariga/Shidaalka/Caymiska** | **$** | |
| **Bixinta Lacagta Gaariga** | **$** | |
| **Dhar dhaqa/Nadaafadda** | **$** | |
| | | |
| | | |
| **Wadarta Dakhliyada** | **$** | |

**Wadarta dakhliga marka laga jaro kharashaadka nolosha** **$________________________**

**Qorshaha Lacagbixinta Muddada Fidsan, Lacagbixinta Billaha ah** **$________________________**